



Waxa la sameeyo muddada korontada la waayo

1. Warbixin ka dhiib fiilooyinka korontada soo dhaca isla markiiba - oo aad uga fogow!
2. Koronto waayitaanka uga warbixi adiga oo u waca **416.542.8000**

DIYAAR AHOW!

In kasta oo inta ugu badan quwadda korontada waayitaankeedu ayna raagin, waa inay qoys kastaa lahaadaan qorshaha xaaladaha degdegga ah, hadday taasi dhacda. Waa tan sida horay loogu taabaabushtayso, oo warqab iyo ammaan loo ahaado muddada korontada la waayo.

Ku tabaabushayso liiskan hubinta

- ✓ Daabaco **Hagahayaga Diyaargarowga Xaaladaha Degdegga ah** ee ku yaal torontohydro.com/emergencykit
- ✓ **Samayso xidhmo xaalado degdeg oo 72-saac ah:**
 1. Biyaha dhalada ku yimaad (3 litir qofkiiba maalintii)
 2. Cunto aan-xumaan oo diyaar u ah in la cuno, qasax fure gacmeed iyo suxuun iyo maacuun hal jeer isticmaal ah
 3. Shamacyo, kabriidyo, qaraaxatooyin, tooshash iyo dhagaax baatariyo oo cusub
 4. Raadiyaha gacanta lagu buuxiyo ama baatariga ku shaqeeya iyo baatariyo oo cusub
 5. Sandduuqa gargaarka degdegga

Ka eeg liiska oo buuxa halkan torontohydro.com/emergencykit

- ✓ **Warqab ahow** — Dhageyso wararka warbaahinta deegaanka oo nagala soco Twitter halkan [@TorontoHydro](https://twitter.com/TorontoHydro).
- ✓ **Buuxso aaladahaaga gacanta** — Haddii roobab culusi soo dhow yihiin, buuxso dhammaan aaladaha oo cusbooneysiiso la xiriiriyada degdegga ah.

Talooyinka badbaadada ee muhiimka ah

- Hoos u dhig kulaylinta korontada ah oo ka saar korontada qalabyada elektaroonigga ah, hadday dhacda fatah quwadeed.
- Ha tegin meel u dhow qalabka korontada ku yaal meelaha qoyan, sida qolka dhulka hoostiisa daadadku galeen.
- Waligaa ha ka tegin shamacyada iyaga oo daayacan.
- Waligaa ha ku isticmaalin dhismaha gudahiisa baarbikiyuga (dubidda), baroobenka ama matoorrada la qaadi karo.
- Ha furin tallaagada ama qaboojiyaha! Badiyaa, cuntada ayaa sideeda ahaata 24 illaa 48 saacadood haddii albaabbadu xiran yihiin. Haddii aad ka shakido inay cuntadu xumaatay, iska tuur.
- Ka warhay oo hubi qoyskaaga, asxaabtaada iyo deriskaagaba.
- Si aad u hesho talooyin badbaado oo dheeraad ah, booqo: torontohydro.com/safety

Nala xiriir



Foomka tixraaca dhakhsaha leh ee xaaladaha degdegga ah ee goyska

Ku qor hoosta faahfaahinta qorshaha xaaladda degdegga ah ee qoyskaaga. Markaas warqaddan ku hayso meel si fudud aad uga helsho, oo aad ugu diyaar noqoto roobabka culus ee da'a marka xigta!

GOOBTA KU KULANKA XAALADAHA DEGDEGGA AH (GURIGA DIBADDIISA)

Goobta: _____

LA XIRIIRKA XAALADAHA DEGDEGGA AH EE DEEGAANKA

Magaca: _____

Telefan Guri: _____

Taleefan Gacan: _____

Cinwaanka Guri: _____

Taleefanka Shaqada: _____

LA XIRIIRKA KA BAXSAN AGAAGA DEEGAANKA

Magaca: _____

Telefan Guri: _____

Taleefan Gacan: _____

Cinwaanka Guri: _____

Taleefanka Shaqada: _____

DHAQTARKA QOYSKA

Magaca Dhakhtarka: _____

Lambarka Taleefoonka Dhakhtarka: _____

Dawada u Dhakhtarku u Qoray: _____

Xasaasiyadaha/Baahiyaha Gaarka ah: _____

DUGSIGA(YADA)/SHIRKADDA

Magaca: _____

Taleefan lambar: _____

HAY'ADDA CAYMIS/SHIRKADDA

Magaca Shirkadda: _____

Taleefan Lambar: _____

Lambar Heshiis Guri: _____

Lambar Heshiis Gaari: _____

Ma cimilo-maalmeed daran ayaa soo dhow?

1. Dami oo ka saar fiillada qalabka korontada aan loo baahnayn.
2. Cusbooneysiyo buuxsiga dawooyinkaaga dhakhtarku qoray oo dhan.
3. Xafido daaqadaha iyo albaabbada iyo waliba qfarnijarkaiyo qalabka dibedda yaal.
4. Shidaal ka buuxso gaadhigaaga, haddii laga yaabo in aad ugu baahato inaad uga tagto meesha si degdeg ah.
5. Dhigo gaadhigaaga meel la ilaaliyo, haddii ay suuragal tahay.

Ogeysiinta taageerada nolasha

Haddii aad ku tiirsantahay qalab caafimaad koronto ku shaqeeya, sida qalabka neefsiga ama mishiinka kelyaha nadiifiya, fadlan annaga iskakaayo diiwaangali si laguugu wargaliyo quwad waayitaanka la qorsheeyay.

Wac **416.542.8000** ama booqo bartayada interneka.

